

Mudane: Maxamed Shariif Cali Aadam (Shaafi)

FARRIINTA

Agaasimha Guud ee Mac-hadka Cilmi baadhista Xoolaha iyo Beeraha D.D.S.

Kordhinta wax soo saarka beeruhu waxa uu ku xidhanyahay kor u qaadidda helitaanka iyo isticmaalka aqoonta iyo dhaqan gelinta farsamooyinka beeraha ee casriga ah. Si haddaba loo xaqiijiyo hadafkani, ayaa waxaa loo aqoonsaday in uu ku dhaqanka xilli beereeyada kala duwan ee ku qotoma goobta iyo goorta habboon iyo dhinaca kale isticmaalka abuurka tayaysan iyo weliba adeegsiga farsamooyinka casriyaysan ee falashada dalaggu ay fure u yihiin kor u qaadidda wax soo saarka beeraha iyo guud ahaanba soo saaridda dalagga, taasi oo lagu gaadhi karo xaqiijinta higsiga dammaanadda cuntada.

Aqoobsiga xilli beereedka habboon, soo saaridda abuurka tayada leh iyo sare u qaadidda isticmaalka beeraleyda ee abuurka iyo dhaqan gelinta dhammaan farsamooyinka casriga ah ee beero qodashada ayaa ah tallaabooyinka ugu muhiimsan ee lagu xaqiijin karo gaadhidda yoolka la higsanayo ee ku wajahan xal u helidda baahida cunnada ee dadkeenna. Iyada oo taasi laga duulayo, ayaa Dawladda Itoobiya waxa ay aaqoonsatay in habka abuur soo saarista iyo isticmaalka xidhmada soo saaridda dalaggu ay yihiin meelaha ugu muhiimsan ee ay tahay in laga shaqeeyo, lana dejiyo ujeeddooyinka qaran ee soo saaridda adeegyadaasi.

Sidaasi daraaddeed, ayaa waxaa waajib ah soo saaridda dalagga guud ahaan iyo gaar ahaan abuurka xulkaahba in si fiican loo ogaado loona dhaqan geliyo xilliyada ugu habboon ee ay tahay in wax la beero, iyada oo aynu ognahay in uu dalag waliba leeyahay goob iyo goor ay beeristiisu ku habboontahay. Iyada oo arrin taasi muhimadda ay leedahay laga duulayo ayaa la diyaariyay Xilli brreed hagahan si uu wax soo saarkeennu u noqdo mid taabbagala.

TUSMADA BUUGGA

ARAR **6**

XOG KU SAABSAN ISTICMAALKA HAGAHA **8**

HORDHAC **9**

QAYBTA KOWAAD: **10**

DALAGYADA ADAAMUHU QUUTO **10**

CUTUBKA KOWAAD **11**

DALAGYADA FIRILEYDA (CEREAL CROPS) **11**

1.1. GALLEY (MAIZE) (Zea mays L.) 11

1.2. HADHUUDH (SORGHUM) (Sorghum bicolor L.) 13

1.3. QAMADIGA FURINKA (BREAD WHEAT) (Triticum aestivum) 15

1.4. HEEDDA (BARLEY) (Hordeum vulgare) 16

1.5. SARREENKA (Avena sativa) 18

1.6. BARIIS (RICE) (Oryza sativa L.) 19

1.7. DUKHUN (PEARL MILLET) (Pennisetum glaucum L.) 21

CUTUBKA LABAAD **23**

DALAGYADA SALIIDDA (OIL CROPS) **23**

1.8. SISIN (SESAME) (Sesamum indicum) 23

1.9. LAWS (GROUNDNUT/PEANUT) (Arachis hypogaea) 24

CUTUBKA SEDDEXAAD **26**

DALAGYADA DIGIRAHA (LAGUME CROPS) **26**

DIGIR (Vigna unguiculata) 27

3.2. DIGIR (COWPEA SMALL) (Vigina unguiculata) 28

3.3. HAARIKOOT (HARICOT BEAN) (Phaseolus vulgarus) 30

3.4. SHUMBURO (CHICKPEA/GRAM) (Cicer arietinum) 31

3.5. SALBUKO (MUNG BEAN) (Vigna radiata L.) 32

3.6. MISIR (LENTIL) (Lens culinaris Medika) 34

CUTUBKA AFRAAD **36**

DALAGYADA KHUDAARTA **36**

4.1. BASAL (ONION) (Allium cepa L.) 36

4.2. TAMAANDHO/XABUUB/YAANYO (TOMATO) (Lyocperrsicum esculentum.Mill) 37

4.3. BASBAAS/QAJI (SWEET/HOT PEPPER) (Capsicum annum) 38

4.4. KAAROOT (CARROT) (Daucus carota L.) 40

4.5. XABXAB/QARE (WATERMELON) (Tikiti maji) 41

4.6. KAABASH (CABBAGE) (Brassica oleracea) 43

4.7. SALLADH (LETTUCE) (Lactuca sativa) 44

CUTUBKA SHANAAD **46**
DALAGYADA GEED MIDHOODKA **46**
5.1. LIIMAHA (CITRUS) 46
4.8. MAANGO (MANGO) (Mangifera indica) 47
4.9. MUUS (BANANA) (Musa spp.) 49
4.10. BABAAY (PAPAYA) (Carica papaya) 50
4.11. SAYTUUN (GUAVA) (Psidium guajava L.) 52
QAYBTA LABAAD: **54**
DALAGYADA CALAFKA **54**
CUTUBKA LIXAAD **55**
DALAGYADA CALAFKA (FODDER CROPS) **55**
6.1. CAWS SUUDAAN (SUDAN GRASS) (Sorghum bicolor) 55
6.2. CAWS MAROODI (ELEPHANT GRASS) (Pennisetum purpureum) 56
6.3. CAWS LO'AAD (BUFFALO GRASS) (Cenchrus Ciliaris) 58
6.4. CAWSKA ROODAS (RHODES GRASS) (Chloris gayana) 60
6.5. BAANIKAM (PANICUM) (Panicum coloratum L.) 62
6.5. LABLAB (DOLICIUS LABLAB) (Lablab purpureus) 64
6.6. CALAFKA ALFALFA (ALFALFA) (Medicago sativa) 66

TUSMADA SHAXAHA

Shaxda 1aad. Muddeeyaha Xilliyada Beerista iyo Goynta Dalagga Galleyda....12
Shaxda 2aad. Muddeeyaha Xilliyada Beerista iyo Goynta Dalagga Galleyda....12
Shaxda 3aad: Xidhmada Soo Saaridda Dalagga (Melkasa-2)....12
Shaxda 4aad. Muddeeyaha Xilliyada Beerista iyo Goynta Dalagga Hadhuudhka....13
Shaxda 6aad: Xidhmada Soo Saaridda Dalagga (Teshale)....14
Shaxda 7aad: Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Qamadiga Furinka....15
Shaxda 9aad: Xidhmada Soo Saaridda Dalagga (Pavon 76)....15
Shaxda 10aad: Muddeeyaha Beerist iyo Goynta Dalagyada Heedda....16
Shaxda 11aad: Muddeeyaha Beerist iyo Goynta Dalagyada Heedda....17
Shaxda 12aad: Xidhmada Soo Saaridda Dalagga Heedda....17
Shaxda 13aad: Muddeeyaha Beerist iyo Goynta Dalagga Sarreenka....18
Shaxda 14aad: Muddeeyaha Beerist iyo Goynta Dalagga Sarreenka....18
Shaxda 15aad. Xidhmada Soo Saaridda Dalagga Sarreenka....18
Shaxda 16aad: Muddeeyaha Xilliyada Beerista iyo Goynta Dalagga Bariiska....19
Shaxda 17aad: Xidhmada Soo Saaridda Dalagga Bariiska....20
Shaxda 18aad. Muddeeyaha Xilliyada Beerista iyo Goynta Dalagga Dukhunka....21
Shaxda 19aad. Xidhmada Soo Saaridda Dalagga Dukhunka....21
Shaxda 20aad. Muddeeyaha Xilliyada Beerista iyo Goynta Dalagga Sisinta....23
Shaxda 21aad. Xidhmada Soo Saaridda Dalagga Sisinta....23
Shaxda 22aad: Muddeeyaha Xilliyada Baarista iyo Goynta Lawska....25
Shaxda 23aad:Xidhmada Soo Saaridda Dalagga Lawska....25
Shaxda. 24 Dalagyo ka mid ah digiraha ee laga soo saaro Itoobiya....26
Shaxda 25. Muddeeyaha Xilliyada Beerista iyo Goynta Dalagga Digirta (Crop Calendar)....27
Shaxda 26aad. Xidhmada Soo Saaridda Dalagga Digirta....27
Shaxda 27aad. Muddeeyaha Xilliyada Beerista iyo Goynta Dalagga Digirta (Crop Calendar)....28
Shaxda 28aad. Muddeeyaha Xilliyada Beerista iyo Goynta Dalagga Digirta (Crop Calendar)....28
Shaxda 29aad. Xidhmada Soo Saaridda Dalagga Digirta....29
Shaxda 30aad. Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Atarka....30
Shaxda 31aad. Xidhmada Soo Saaridda Dalagga Atarka....30
Shaxda 3 2 aad. Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Shumburada....31
Shaxda 33aad. Xidhmada Soo Saaridda Dalagga Shumburada....31
Shaxda 34aad. Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Salbukada (Crop Calendar)....32
Shaxda 36aad. Xidhmada Soo Saaridda Dalagga Salbukada....33
Shaxda 3 7 aad. Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Misirka (Crop Calendar)....34
Shaxda 3 8 aad. Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Misirka (Crop Calendar)....34
Shaxda 39aad. Xidhmada Soo Saaridda Dalagga Salbukada....34
Shaxda 40aad. Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Basasha (Crop Calendar)....36
Shaxda 42aad. Xidhmada Soo Saaridda Dalagga Basasha....36
Shaxda 43aad. Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Xabuubka (Crop Calendar)....37
Shaxda 44aad. Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Xabuubka (Crop Calendar)....37
Shaxda 45aad. Xidhmada Soo Saaridda Dalagga Yaanyada....37
Shaxda 46aad. Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Basbaaska/Qaji (Crop Calendar)....38
Shaxda 47aad. Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Basbaaska/Qaji (Crop Calendar)....38
Shaxda 48aad. Xidhmada Soo Saaridda Dalagga Basbaaska....39
Shaxda 49aad. Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Kaarootada (Crop Calendar)....40
Shaxda 50aad. Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Kaarootada (Crop Calendar)....40
Shaxda 51aad. Xidhmada Soo Saaridda Dalagga Kaarootada....40

Shaxda 52aad. Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Xabxabka/Qaraha (Crop Calendar) 41
Shaxda 53aad. Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Xabxabka/Qaraha (Crop Calendar) 42
Shaxda 54aad. Xidhmada Soo Saaridda Dalagga Xabxabka/Qaraha 42
Shaxda 55aad. Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Kaabashka (Crop Calendar) 43
Shaxda 56aad. Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Kaabashka (Crop Calendar) 43
Shaxda 57aad. Xidhmada Soo Saaridda Dalagga Kaabashka 43
Shaxda 58aad. Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Kaabashka (Crop Calendar) 44
Shaxda 59aad. Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Kaabashka (Crop Calendar) 44
Shaxda 60aad. Xidhmada Soo Saaridda Dalagga Salladhka 44
Shaxda 61aad. Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagyada Liimaha (Crop Calendar) 46
Shaxda 62aad. Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagyada Liimaha (Crop Calendar) 46
Shaxda 63aad. Xidhmada Soo Saaridda Dalagga Liimaha 46
Shaxda 64aad. Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Maangada (Crop Calendar) 47
Shaxda 65aad. Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Maangada (Crop Calendar) 47
Shaxda 66aad. Xidhmada Soo Saaridda Dalagga Maangada 48
Shaxda 67aad. Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Muuska (Crop Calendar) 49
Shaxda 68aad. Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Muuska (Crop Calendar) 49
Shaxda 69aad. Xidhmada Soo Saaridda Dalagga Muuska 49
Shaxda 70aad. Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Babaayga (Crop Calendar) 50
Shaxda 71aad. Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Babaayga (Crop Calendar) 50
Shaxda 72aad. Xidhmada Soo Saaridda Dalagga Babayga 51
Shaxda 73aad. Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Saytuunka (Crop Calendar) 52
Shaxda 74aad. Xidhmada Soo Saaridda Dalagga Saytuunka 52
Shaxda 75aad: Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Sudan grass (Crop Calendar) 55
Shaxda 76aad: Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Sudan grass (Crop Calendar) 55
Shaxda 77aad: Xidhmada Soo Saaridda Dalagga Caws Suudaanka 55
Shaxda 78aad: Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Caws Maroodiga (Crop Calendar) 56
Shaxda 79aad: Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Caws Maroodiga (Crop Calendar) 56
Shaxda 80aad: Xidhmada Soo Saaridda Dalagga Caws Maroodiga 57
Shaxda 81aad: Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Cawska Lo'da Gisida (Crop Calendar) 58
Shaxda 84aad: Xidhmada Soo Saaridda Dalagga Caws Lo'aadka 59
Shaxda 85aad: Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Cawska Roodaska (Crop Calendar) 60
Shaxda 86aad: Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Cawska Roodaska (Crop Calendar) 60
Shaxda 88aad: Xidhmada Soo Saaridda Calafka Roodasaka 61
Shaxda 89aad: Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Baanikamka (Crop Calendar) 62
Shaxda 93aad: Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Lablabka (Crop Calendar) 64
Shaxda 94aad: Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Lablabka (Crop Calendar) 64
Shaxda 96aad: Xidhmada Soo Saarista Dalagga Lablabka 65
Shaxda 97aad. Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Calafka Alfalfa (Crop Calendar) Ee Gobollada Ay Karantu Ka Da'do 66
Shaxda 100aad. Xidhmada Soo Saarista Calafka Alfalfaha 67

ARAR

Muddeeyaha xilliga beerista dalaggu (Crop calendar) waa hage inna siinaya macluumaad aynu ku gaadhno go'aanka xilliyada wax la beerayo, taasina waxa ka dhalanaya kor u qaadista wax soo saarka beero-qodatada deegaanka. Muddeeyuhu waxa uu ka koobanyahay macluumaad la xidhiidha xilliyada beeritaanka iyo goosashada dalagyada la qabsaday cimilada deegaanka.

Hagahani waxa uu ka taageerayaa beeraleyda iyo shaqaalaha fidinta beeraha ee deegaanka guud ahaan in ay qaataan go'aannada ku habboon ee ku saabsan dalagyada iyo xilliyada beerashada, iyada oo laga eegayo dhinaca cimila-beereedka. Waxa uu hagahani sidoo kale saldhig u yahay qorshaynta xaaladaha deg-degga ah ee dib-u-habaynta nidaamyada beeraha ka dib masiibooyinka dabiiciga ah.

Intaasi waxaa sii dheer in uu hagahani ku siinayo macluumaadka la xidhiidha dalagyada cunnada aadamuhu quuto iyo kuwa calafka xoolaha ee ugu muhiimsan, (kuwaasi oo lagu kala beero biyaha roobka iyo kuwa waraabka) labadaasi oo laga helo qaybo ka mid ah 11gobol iyo 93 degmo ee uu ka koobanyahay deegaanka Soomaalidu.

Muddeeyahani waxa kale oo la socda qayb si kooban u taabanaysa farsamooyinka casriga ah ee beero qodashada. Dalag walba oo ah kuwa ay inta badan dadka deegaanku beertaan isla markaana ay quutaan ayaa waxa loo sameeyay xidhmada soo saarista dalagga oo beeraleyda iyo shaqaalaha fidintaba u fududaynaysa jidkii ay u mari lahaayeen xirfadda ay hayaan ee beero qodashada.

Waxa loogu talo galay in dadka adeegsanaya muddeeyaha dalaggu ay xogaha ugu muhiimsan ee la xidhiidha falashada dalaggu ay halkan ka helaan iyaga oo aan meel kale wax u raadsannin isla markaana loogu soo gudbinayo hab uu fududyahay fahankiisu aadna u kooban isla markaana xanbaarsan macluumaad badan. Dadka ku hawllan tacabka beeraha ayaa si fudud uga wada heli doona xilliyada iyo hababka habboon ee ku aaddan falashada beeraha taasina waxa ay kor u qaadi doontaa wax soo saarka iyo dammaanadda cuntada ee shakhsiga, qoyska, tuulada, degmada, gobolka, deegaanka iyo qaranka intaba.

EREY BIXIN

Gu, Karan iyo Dayr - Waa magacyada xilli robaadyada degaanka. Dadka soomaalida ah ee deegaanka ku dhaqani siyaabo kala duwan ayay u adeegsadaan magacayada xilli roobaadka. Iyada oo taasi laga duulayo ayaa waxa aannu isku daynay in aannu isticmaallo magacyada laga yaqaanno gobollada intooda badan. Haddaba iyada oo ay meel waliba sida ay u taqaanno ay tahay haddana waxa muhiim ah in aynu halkan ku caddayno magaca iyo macnaha looga jeedo.

Gu - Waa xilli roobaad deegaanku wada leeyahay oo ka billawda dhammaadka bisha March iyo billawga bisha April.

Karan - Waa xilli roobaad ay helaan inta badan degmooyinka gobolka Faafan iyo meelaha kale ee la cimilada ah waxa uuna da'aa xilli gobollada intooda badan looga yaqaanno Xagaa. Xilli roobaadkan ayaa curta badhtamaha ilaa dhammaadkeeda bisha July.

Dayr - Waa xilli roobaad u gaar ah gobollada aynan karantu ka di'in waxa uuna billawdaa dhammaadka bisha September ilaa iyo billawga bisha October.

XOG KU SAABSAN ISTICMAALKA HAGAHA

Waxaa hagahani ku qeexan shaxo kala duwan, haddaba shaxda koobaad ayaa waxa ay inna tusaysaa xilliga ku habboon beerista iyo goynta dalagga, sidoo kalena kala duwanaanshaha xilli roobaadka ee gobollada ayaa ku cad. Shaxda labaad ayaa iyana ka hadlaysa xidhmada soo saaridda dalagga. Waxaa sidoo kale jira shax seddexaad oo u gaar ah qaar ka mid ah dalagyada calafka xoolaha taasi oo lagu muujinayo tilmaamaha iyo waxyaabaha xaddida bixitaankiisa.

Noocyo ka mid ah dalagyada qaarkood ayaa hagahani lagu muujiyay xidhmadooda soo saaridda, haddaba haddii ay jiraan noocyo kale oo isla dalaggaasi ah oo aan ahayn noocani halkan ku xusan ayaa waxaa soo saariddiisa loo isticmaali karaa xidhmada dalaggaasi ee ku cad buuggan.

Dhinaca kale gobollada aan shaxaha dalagyada qaarkood ku jirini waa gobollada aan si aad ah looga beerin dalaggaasi shaxda lagu qeexay, sidaasi darteed haddii ay beeraleyda goobahaasi deggani ay la qabsadaan beerista dalaggani waxa ay raacayaan gobollada kale ee ay isku cimilo-beereedka yihiin marka laga eego dhinaca xilli roobaadka (Gu, Karan iyo Dayr).

In kasta oo beerista dalagga qamadida ee degaankeenna uu yahay mid xilli dhow si baahsan looga billaabay banka ku hareeraysan Jigjiga iyo meelo ka mid ah gobolka Liibaan, ayaa waxaa muddo u dhexaysay (2019 – 2021) laga billaabay gobolka Shabeelle fulinta mashruuc tijaabo ah oo qamadi beerid ah taasi oo lagu guulaystay lana filayo in ay dhowaan beeraleydu si baahsan u beeri doonaan. Haddaba goorta ay arrintaasi hirgasho waxa la raaci doonaa xilliyada uu muddeeyahani u dhigay gobol walba.

HORDHAC

Wax soo saarka dalagyada cunnada ayaa muhiim u ah fayo qabka aadamaha, balse isbeddelka cilmilada degaanka ayaa waxa ay khatar wayn ku tahay wax soo saarka dalagga sababo la xidhiidha xaaladaha lama filaanka ah ee ka dhasha roob yaraanta taasi oo keenta ama sababta in uu hoos u dhac ku yimaado wax soo saarka isla markaana ay taasi caqabad ku noqoto dammaanad qaadka cuntada adduunka. Buuggan ayaa ka kooban laba qaybood oo waawayn oo ka kala hadlaya dalagyada ay dadku quutaan iyo kuwa ay xooluhu calfadaan.

Qaybta koowaad ee buggani ayaa waxa ay ka koobantahay Shan cutub oo lagaga hadlayo dalagyada aadamuhu quuto. Cutubka koowaad ayaa si faahfaahsan waxa loogaga hadlayaa dalagyada firileyda ee sida ballaadhan looga isticmaalo dalka iyo degaankaba iyo weliba kuwo aan si baahsan loo qodannin wakhtigan la joogo balse mustaqbal fiican yeelan kara. Dalagyadaasi ayaa waxa ka mid ah; Galleyda, Qamadida, Hadhuudhka, Heedda, Sarreenka, Bariiska iyo Dukhunka. Cutubka labaad ayaa isaguna soo bandhigaya dalagyada Saliidleyda oo ay ka mid yihiin Sisinta iyo Lawska. Halka Cutubka seddexaadna loogaga hadlayo dalagyada Digiraha sida Digirta, Faasuuliyada (haarikootka), Shumburada, Salbukada iyo Misirka. Waxaa sidoo kale Cutubka afraad lagu soo bandhigayaa dalagyada kala duwan ee Khudaarta sida Basasha, Tamaandhada, Basbaaska, Xabxabka, Kaabashka, Kaarootada iyo Salladhka. Gabagabadii Cutubka shanaad ayaa ka hadlaya Geed-midhoodka oo ay ka mid yihiin Liimaha, Maangada, Babayga, Muuska iyo Saytuunka.

Qaybta labaad ee hagahani ayaa innoo faahfaahinaysa Dalagyada Calafka xoolaha kuwaasi oo saldhig u ah kor u qaadidda cadka iyo caanaha xoolaha iyaga oo door laxaad leh ka qaata nafaqaynta xoolaaha si gaar ahna door muhiim ah ka qaata quudinta/calfinta xoolaha ee xilliyada abaaraha si looga hor tago daaq iyo calaf yaraan ku timaadda xoolaha taasina lagaga baaqsado hoos u dhac ku yimaadda wax soo saarkooda iyana ay saamayn taban ku yeelato dammaanadda cuntada. Haddaba qaybta labaad ee buuggani ayaa waxa ku hoos jira Cutubka lixaad kaasi oo si faahfaasan uga hadlaya dalgyada calafka xoolaha ee ay beeristooda la qabsadeen dadka deegaanku isla markaana ku habboon cimilada dhammaan gobolladeenna. Dalagyaadaasi calafka xoolaha ee aynu halkan ku soo bandhigayno ayaa waxa ka mid ah; Caws Sudaan, Caws Maroodi, Caws Lo'aad, Cawska Roodas, Cawska Baanikamka, Lablabka iyo Alfalfa.

QAYBTA KOOWAAD:
DALAGYADA ADAAMUHU QUUTO

CUTUBKA KOWAAD
DALAGYADA FIRILEYDA (CEREAL CROPS)

1.1. GALLEY (MAIZE) (Zea mays L.)

Geedka galleyda ayaa asalkiisu waxa uu ka soo jeedaa Badhtamaha Ameerika iyada oo ay soo gaadhsiiyeen ganacsato Boortaqiis ahi Galbeedka Afrika billawgii sannadihii 1500. Itoobiya waxa uu dalagga galleydu soo gaadhay sannadihii 1960 – 1970. Maantana galleydu waxa ay ka mid tahay cuntooyinka ugu muhiimsan ee dunida. Galleydu waa dalag ka baxa inta badan daafaha dunida isaga oo awood u leh u adkaysiga dhul aad u kala cimilo duwan. Dhinaca Itoobiya dalagga galleydu waxa uu ka baxaa laga billaabo dhulka oommanaha ah ee ay biyuhu ku yaryihhin ilaa dhulka ay ka da'aan roobab aad u xooggani iyo sidoo kale dhulka jooggiisu hooseeyo ilaa iyo meelaha uu jooggoodu sarreeyo marka loo eego badda (0 – 3000masl). Inta badan waddankeenna galleyda waxaa loo isticmaalaa cunto ahaan, gobollada ugu badan ee laga soo saaraana waa gobollada dhaqalahoodu hooseeyo kuwaasi oo ay dadku u isticmaalaan qaabab kala duwan oo ay ka mid yihiin, Shuuro/Jidhiidh/Soor, Canjeero, Boorash, Furin/Rooti, Canbuulo, Faracad iwm.

Shaxda 1aad. Muddeeyaha Xilliyada Beerista iyo Goynta Dalagga Galleyda

Gobolka	Dalagga	Wakhtiga	Xilliga	Billawga	Dhammaadka
SITI iyo FAAFAN	**Galley**	Beerista	Gu	March (Dhamm.)	April (Billaw)
		Goynta	Gu	June (Dhamm.)	July (Billaw)
		Beerista	Karan	July (Dhexda)	July (Dhamm.)
		Goynta	Karan	September (Dhexda)	September (Dhamm.)

Shaxda 2aad. Muddeeyaha Xilliyada Beerista iyo Goynta Dalagga Galleyda

Gobolka	Dalagga	Wakhtiga	Xilliga	Billawga	Dhammaadka
JERER, QORRAXAY, NOGOB, SHABEELLE, LIIBAAN, AFDHEER, DAAWA, ERER IYO DOOLLO	Gallay	Beerista	Gu	March (Dhamm.)	April (Billaw)
		Goynta	Gu	June (Dhamm.)	July (Billaw)
		Beerista	Dayr	September (Dhamm.)	October (Billaw)
		Goynta	Dayr	December (Dhamm.)	January (Billaw)

Dalagga (Crop): Galley (Maize) (*Zea mays L.*)

Nooca (Variety): Melkasa-2 (ZM-521)

Shaxda 3aad: Xidhmada Soo Saaridda Dalagga (Melkasa-2)

Tirsi	**Maaraynta Beerta**	
1	Dhulka uu la Qabsaday	Shabeelle, Afdheer, Liibaan, Banka Jigjiga iyo degaanka intiisa kale
	Baahida Roobka	600 – 1000mm/sannadkii
2	Xaddiga Abuurka (kg/ha)	25 – 30
3	Kala Fogaynta Dhirta	Labada sadar 75 cm, labada geedna 25 cm
4	Xadiga Urea (Kg/ha)	100kg/ha oo la isticmaalayo marka uu dhererka dalaggu gaadho lawga
5	Xadiga Dap (Kg/ha)	50kg/ha waxa loo isticmaali xilliga la beerayo dalagga
6	Qaabka Beeridda	Si toos ah ayaa dhulka loogu daadiyaa haddi sadar lagu beerayo ama la firdhinayo
7	Dhererka Godka Abuurka	5cm
8	Biilaynta	70 maalmood
9	Bislaadka	140 maalmood
10	Cimriga Kooxda	Waxa uu ka mid yahay kooxda cimrigeedu dhex-dhexaadka yahay

11	Midabka Abuurka	Caddaan
12	Dhererka Geedka	110 cm
13	Dhadhanka iyo Tayada	Aad u Wanaagsan
14	Falcelinta Cudurka	Waxa uu u adkaystaa cudurrada iyo cayayaanka
15	Maxsuulka (q/ha)	30

1.2. HADHUUDH (SORGHUM) (Sorghum bicolor L.)

Asalka dalagga hadhuudhku waa Woqooyiga Afrika, isaga oo haddana si ballaadhan looga beero goobaha dhul-badhaha iyo dhul-badhe xigeenka ah. Dherarka geedka ayaa gadhaa 4m halka dhumucdiisuna ay gadho 3 ilaa 4 mm. Hadhuudhku waa dalagga ugu adkaysiga badan marka laga fiiriyo dhinaca roob yaraanta waxa uuna leeyahay xidid dheer oo arrintaasi ka caawiya. Dalagga hadhuudhku waa mid ka mid ah midhaha ugu muhiimsan ee laga soo saaro Itoobiya.

Shaxda 4aad. Muddeeyaha Xilliyada Beerista iyo Goynta Dalagga Hadhuudhka

Gobolka	Dalagga	Wakhtiga	Xilliga	Billawga	Dhammaadka
Siti Iyo Faafan	Galley	Beerista	Gu	March (Dhamm.)	April (Billaw)
		Goynta	Gu	June (Dhamm.)	July (Billaw)
		Beerista	Karan	July (Dhexda)	July (Dhamm.)
		Goynta	Karan	September (Dhexda)	September (Dhamm.)

Shaxda 5aad. Muddeeyaha Xilliyada Beerista iyo Goynta Dalagga Hadhuudhka

Gobolka	Dalagga	Wakhtiga	Xilliga	Billawga	Dhammaadka
Jerer, Qorraxay, Nogob, Shabeelle, Liibaan, Afdheer, Daawa, Erer iyo Doollo	Gallay	Beerista	Gu	March (Dhamm.)	April (Billaw)
		Goynta	Gu	June (Dhamm.)	July (Billaw)
		Beerista	Dayr	September (Dhamm.)	October (Billaw)
		Goynta	Dayr	December (Dhamm.)	January (Billaw)

Dalagga (Crop): Hadhuudh (Sorghum) (*Sorghum bicolor L.*)

Nooca (Variety: Teshale (3443-2-OP)

Shaxda 6aad: Xidhmada Soo Saaridda Dalagga (Teshale)

Tirsi	**Maaraynta Beerta**	
1	Dhulka uu la Qabsaday	Banka Jigjiga, Shabeelle, Afdheer, Liibaan, iyo degaanka intiisa kale
2	Baahida Roobka	600 – 1000mm/sannadkii ama waraab lagu caawiyo
3	Joogga Dhulka	500 – 1750 masl (inta mitir ee uu badda ka sarreeyo)
4	Xaddiga Abuurka (kg/ha)	15 – 20
5	Kala Fogaynta Dhirta	Labada sadar: 75cm iyo labada geed oo ah: 16cm
6	Bacrinta (kg/ha)	
7	Urea	100kg/ha oo loo kala qaybiyo laba: (2/3) xilliga gun dillaaca ayaa la adeegsan, halka qaybta labaadna (1/3) loo i isticmaalayo xilliga uu sabuulka soo saaro.
8	Dap	100Kg/ha waxa loo adeegsan goorta abuurka la beerayo
9	Qaabka Beeridda	Abuurka oo lagu daadiyo sadar ama in la saydho/firdhiyo
10	Dhererka Godka Abuurka	2 – 3cm
11	Sabuul bixinta	50 – 60 maalmood
12	Bislaadka	90 – 115 maalmood
13	Cimriga Kooxda	Waxa uu ku jiraa dalagyada degdegga u bislaada
14	Midabka Abuurka	Bunni
15	Dhererka Geedka	60cm
16	Dhadhanka iyo Tayada	Aad u wanaagsan
17	Falcelinta Cudurka	Waxa uu adkaysi u leeyahay cayayaanka iyo cudurrada
18	Maxsuulka (q/ha)	25

1.3. QAMADIGA FURINKA (BREAD WHEAT) (Triticum aestivum)

Itoobiya waa meelaha ugu badan ee laga soo saaro qamadiga waddammada saxaraha ka hooseeya ee Afrika. Qamadigu waa waxyaabaha ugu muhiimsan dalagyada firileyda ah ee dhulka buuraleyda ah ee Itoobiya, dhulkaasi oo khadadka u dhexeeya (6 and 16ºN 35 and 42E) kaasi oo badda ka sarreeya 1500 – 2800m. Sannad beereedkii 2016/17 dhulka la beeray ayaa waxa uu dhannaa 1,696,082.59 hektar iyada oo lagu beeray labada nooc ee qamadiga ah ee laga kala sameeyo furinka iyo baastada waxana ka soo go'ay maxsuul dhan 45,378,523.39 Kiintaal.

Shaxda 7aad: Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Qamadiga Furinka

Gobolka	Dalagga	Wakhtiga	Xilliga	Billawga	Dhammaadka
Faafan	Qamadi	Beerista	Karan	July (Dhexda)	July (Dhamm.)
		Goynta	Karan	September (Dhexda)	September (Dhamm.)

Shaxda 8aad: Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Qamadiga Furinka

Gobolka	Dalagga	Wakhtiga	Xilliga	Billawga	Dhammaadka
Liibaan	Qamadi	Beerista	Gu	March (Dhamm.)	April (Billaw)
		Goynta	Gu	June (Dhamm.)	July (Billaw)
		Beerista	Dayr	September (Dhamm.)	October (Billaw)
		Goynta	Dayr	December (Dhamm.)	January (Billaw)

Dalagga (Crop): Qamadida Furinka (Bread Wheat) (*Triticum aestvum L.*)

Nooca (Variety): Pavon 76

Shaxda 9aad: Xidhmada Soo Saaridda Dalagga (Pavon 76)

Tirsi	Maaraynta Dalagga	
1	Dhulka uu la Qabsaday	Banka Jigjiga, degmooyinka Tulliguuleed, Awbarre, Haroorays, Shabeelley iyo degmooyin ka mid ah gobolka Liibaan iyo meelaha kale ee la cimilo beereedka ah.
2	Baahida Roobka	600 – 1000mm/sannadkii ama waraab lagu kabo
3	Xaddiga Abuurka (kg/ha)	125 – 150
4	Kala Fogaynta Dhirta	Labada sadar 30 cm, labada geedna 10 cm
5	Bacrinta (kg/ha)	

6	Urea	100kg/ha oo xaddi (2/3) loo isticmaali xilliga gundillaaca halka (1/3) loo adeegsanayo wakhtiga ubaxaynta geedka.stages, respectively
7	Dap	100kg/ha waxa loo isticmaali xilliga la beerayo dalagga
8	Qaabka Beeridda	Si toos ah ayaa dhulka loogu daadiyaa haddi sadar lagu beerayo ama la firdhinayo
9	Dhererka Godka Abuurka	2 – 3cm
10	Madaxaynta	45 – 50 maalmood
11	Bislaadka	75 – 90 maalmood
12	Cimriga Kooxda	Waxa uu ka mid yahay kooxda degdegga u bislaata
13	Midabka Abuurka	Huruud
14	Dhererka Geedka	58 cm
15	Dhadhanka iyo Tayada	Aad u Wanaagsan
16	Falcelinta Cudurka	Waxa uu u adkaystaa cudurrada iyo cayayaanka
17	Maxsuulka (q/ha)	28

1.4. HEEDDA (BARLEY) (Hordeum vulgare)

Sidii aynu horeba ugu soo sheegnay Qamdiga Itoobiya ayaa ah meelaha ugu badan ee laga soo saaro Heedda waddammada saxaraha ka hooseeya. Heedda iyo Qamadiga ayaa dabeecado badan wadaaga marka laga eego dhinaca cimilada waxa uuna ka mid yahay dalagyada firileyda ee ugu muhiimsan kana baxa dhulka buuraleyda ah ee Itoobiya dhulkaasi oo dhaca khadadka u dhaxeeya **(37° 53′17″–37° 53′19″E)** kaasi oo badda ka sarreeya 1800 – 3400m.

Shaxda 10aad: Muddeeyaha Beerist iyo Goynta Dalagyada Heedda

Gobolka	Dalagga	Wakhtiga	Xilliga	Billawga	Dhammaadka
Faafan	Heed	Beerista	Karan	July (Dhexda)	July (Dhamm.)
		Goynta	Karan	September (Dhexda)	September (Dhamm.)

Shaxda 11aad: Muddeeyaha Beerist iyo Goynta Dalagyada Heedda

Gobolka	Dalagga	Wakhtiga	Xilliga	Billawga	Dhammaadka
Liibaan	Heed	Beerista	Gu	March (Dhamm.)	April (Billaw)
		Goynta	Gu	June (Dhamm.)	July (Billaw)
		Beerista	Dayr	September (Dhamm.)	October (Billaw)
		Goynta	Dayr	December (Dhamm.)	January (Billaw)

Dalagga (Crop): Heedda (Barley) (*Hordeum vulgare)*

Shaxda 12aad: Xidhmada Soo Saaridda Dalagga Heedda

Tirsi	Maaraynta Dalagga	
1	Dhulka uu la Qabsaday	Banka Jigjiga iyo degmooyin ka mid ah gobolka Liibaan
2	Baahida Roobka	500 – 700mm/sannadkii ama in waraab lagu kabo haddii xaddigaasi biyaha ah la waayo
3	Xaddiga Abuurka (kg/ha)	125
4	Kala Fogaynta Dhirta	Labada sadar 30 cm, labada geedna 10 cm
5	Bacrinta (kg/ha)	
5.1.	Urea	50 – 100kg/ha hadba baahida geedku sida ay tahay
5.2.	Dap	100kg/ha (kiiloogaraam hektarkiiba)
6	Qaabka Beeridda	Si toos ah ayaa dhulka loogu daadiyaa haddi sadar lagu beerayo ama la firdhinayo
7	Dhererka Godka Abuurka	2 – 3cm
8	Madaxaynta	77 maalmood
9	Bislaadka	137 maalmood
10	Midabka Abuurka	Midabbo kala duwan sida caddaan, huruud iyo kuwo kaleba
11	Dhererka Geedka	65 cm
12	Dhadhanka iyo Tayada	Aad u Wanaagsan
13	Falcelinta Cudurka	Waxa uu u adkaystaa cudurrada iyo cayayaanka
14	Maxsuulka (q/ha)	23

1.5. SARREENKA (Avena sativa)

Shaxda 13aad: Muddeeyaha Beerist iyo Goynta Dalagga Sarreenka

Gobolka	Dalagga	Wakhtiga	Xilliga	Billawga	Dhammaadka
Faafan	Sarreen	Beerista	Karan	July (Dhexda)	July (Dhamm.)
		Goynta	Karan	September (Dhexda)	September (Dhamm.)

Shaxda 14aad: Muddeeyaha Beerist iyo Goynta Dalagga Sarreenka

Gobolka	Dalagga	Wakhtiga	Xilliga	Billawga	Dhammaadka
Liibaan	Sarreen	Beerista	Gu	March (Dhamm.)	April (Billaw)
		Goynta	Gu	June (Dhamm.)	July (Billaw)
		Beerista	Dayr	September (Dhamm.)	October (Billaw)
		Goynta	Dayr	December (Dhamm.)	January (Billaw)

Shaxda 15aad. Xidhmada Soo Saaridda Dalagga Sarreenka

Tirsi	Maaraynta Dalagga	
1	Dhulka uu la Qabsaday	Banka Jigjiga iyo meelaha ay isku cimilada yihiin
2	Baahida Roobka	Wax ka sarreeya 900mm/sannadkii
3	Xaddiga Abuurka (kg/ha)	150kg hektarkiiba
4	Kala Fogaynta Dhirta	Labada sadar 30 cm, labada geedna 10 cm
5	Bacrinta (kg/ha)	
5.1.	Urea	60kg/ha oo la isticmaalayo marka uu dhererka dalaggu gaadho lawga
5.2.	Dap	150kg/ha waxa loo isticmaali xilliga la beerayo dalagga
6	Qaabka Beeridda	Si toos ah ayaa dhulka loogu daadiyaa haddi sadar lagu beerayo ama la firdhinayo
7	Dhererka Godka Abuurka	5cm
8	Biilaynta	–
9	Bislaadka	150 maalmood
10	Cimriga Kooxda	Waxa uu ka mid yahay kooxda degdegga u bislaata
11	Midabka Abuurka	Caddaan
12	Dhererka Geedka	98 cm
13	Dhadhanka iyo Tayada	Aad u Wanaagsan
14	Falcelinta Cudurka	Waxa uu u adkaystaa cudurrada iyo cayayaanka
15	Maxsuulka (q/ha)	42

1.6. BARIIS (RICE) (Oryza sativa L.)

Dalagga Bariisku waa dalagyada ku cusub dalka Itoobiya isaga oo ay beeristiisu ku sinnayd laga soo billaabo 1970 GC waxa uuna ka mid yahay dalagyada firileyda ah ee laga beero qaybo ka mid ah waddanka. Dhulka laga beero dalagga Bariiska ayaa dhaca khadadka (13º19N and 37º03E) kaasi oo badda ka sarreeya 1815 masl, isaga oo dhinaca kalena si fiican ula qabsaday dhulka jooggiisu hooseeyo ee Webiyada Shabeelle, Gannaale, Weeb iyo Daawa inkasta oo aanu weli gaadhin heer si baahsan loo soo saaro.

Shaxda 16aad: Muddeeyaha Xilliyada Beerista iyo Goynta Dalagga Bariiska

Gobolka	Dalagga	Wakhtiga	Xilliga	Billawga	Dhammaadka
Shabeelle, Daawa, Liibaan Iyo Afdheer	Bariis	Beerista	Gu	March (Dhamm.)	April (Billaw)
		Goynta	Gu	June (Dhamm.)	July (Billaw) (Upland)
		Beerista	Gu	March (Dhamm.)	April (Billaw)
		Goynta	Gu	August (Dhamm.)	September (Billaw) (Paddy)
		Beerista	Dayr	September(Dhamm.)	October (Billaw)
		Goynta	Dayr	December (Dhamm.)	January (Billaw) (Upland)
		Beerista	Dayr	September (Dhamm.)	October (Billaw)
		Goynta	Dayr	January (Dhamm.)	February (Billaw) (Paddy)

Shaxda 17aad: Xidhmada Soo Saaridda Dalagga Bariiska

Tirsi	Maaraynta Dalagga	
1	Dhulka uu la Qabsaday	Dooxooyinka afarta webi iyo meelaha kale ee la cimilo beereedka ah biyana leh
2	Baahida Roobka	Waraab joogto ah ayuu dalagga bariisku u baahanyahay
3	Xaddiga Abuurka (kg/ha)	60
4	Kala Fogaynta Dhirta	Labada sadar 20 cm, labada geedna 10 cm
5	Bacrinta (kg/ha)	
5.1.	Urea	150kg/ha oo 2/3 la isticmaalayo marka uu dalaggu gundillaac sameeyo, halka inta kale 1/3 la isticmaalayo ubax bixinta
5.2.	Dap	100kg/ha waxa loo isticmaali dalagga 14 cisho ka dib beerista
6	Qaabka Beeridda	Si toos ah ayaa dhulka loogu daadiyaa haddi sadar lagu beerayo ama la firdhinayo
7	Dhererka Godka Abuurka	3cm
8	Madaxaynta	60 – 69 maalmood
9	Bislaadka	Noocyada NERICA (85cisho) iyo noocyada (irrigated) ka ah (125) maalmood
10	Cimriga Kooxda	Waxa uu ka mid yahay kooxda cimrigeedu dhex-dhexaadka yahay
11	Midabka Abuurka	Caddaan
12	Dhererka Geedka	135 cm
13	Dhadhanka iyo Tayada	Aad u Wanaagsan
14	Falcelinta Cudurka	Waxa uu u adkaystaa cudurrada iyo cayayaanka
15	Maxsuulka (q/ha)	
15.1	Beeraha Cilmi-baadhista	(NERICA) waa (50) halka (Irrigaed) kana uu yahay (43)
15.2	Beeraleyda	(NERICA) waa (64) halka (Irrigaed) kana uu yahay (54)

1.7. DUKHUN (PEARL MILLET) (Pennisetum glaucum L.)

Dalagga Dukhunku waxa uu ka midyahay dalagyada firileyda ee ay falashadoodu ku habboontahay goobaha ay cimiladoodu diirrimaadka tahay. Dalagga Dukhunku waxa uu door wayn ka qaataa dammaanadda cuntada ee goobaha ay inta badan saameeyaan abaaruhu madama uu u adkeysto biyo yaraanta. Dukhunka ayaa laga beeraa dhulkasi oo dhaca khadadka u dhexeeya (06$^{\theta}$ 20′ 45″N and 335$^{\theta}$54′E) kaasi oo badda ka sarreeya masl.

Shaxda 18^{aad}. Muddeeyaha Xilliyada Beerista iyo Goynta Dalagga Dukhunka

Gobolka	Dalagga	Wakhtiga	Xilliga	Billawga	Dhammaadka
Faafan	Dukhun (Millets)	Beerista	Gu	March (Dhamm.)	April (Billaw)
		Goynta	Gu	June (Dhamm.)	July (Billaw)
		Beerista	Karan	July (Dhexda)	July (Dhamm.)
		Goynta	Karan	Sep. (Dhexda)	Sep. (Dhamm.)

Shaxda 19^{aad}. Xidhmada Soo Saaridda Dalagga Dukhunka

Tirsi	Maaraynta Dalagga	
1	Dhulka uu la Qabsaday	Degmooyinka Harawa iyo Awbarre iyo dhulka qallalan ee la cimilada ah
2	Baahida Roobka	Waa dalag ku baxa roobka una baahan xaddi ku filan
3	Xaddiga Abuurka (kg/ha)	3 – 4
4	Kala Fogaynta Dhirta	Labada sadar 45 cm, labada geedna 10 – 15cm
5	Bacrinta (kg/ha)	
5.1.	Urea	100kg/ha oo loo kala qaybiyo laba: (2/3) xilliga gun dillaaca ayaa la adeegsan, halka qaybta labaadna (1/3) loo i isticmaalayo xilliga uu sabuulka soo saaro.
5.2.	Dap	100Kg/ha waxa loo adeegsan goorta abuurka la beerayo
6	Qaabka Beeridda	Si toos ah ayaa dhulka loogu daadiyaa haddi sadar lagu beerayo ama la firdhinayo
7	Dhererka Godka Abuurka	1.25 – 1.9cm
8	Madaxaynta	40 – 50 maalmood ka dib beerista
9	Bislaadka	75 – 85 maalmood ka dib beerista
10	Dhererka Geedka	0.5 – 4m
11	Dhadhanka iyo Tayada	Aad ayuu u wanaagsanyahay qaabab badanna waa loo isticmaalaa isla

		markaana nafaqooyin badan oo aadamaha faa'iido nafaqayneed u leh ayaa ku jira.
12	Maxsuulka (k/ha)	7 – 14 kiintaal hektarkiiba oo ay sal u yihiin nooca dalagga, carrada, cimilada iyo adeegga loo fidiyo dalagga muddada uu beeranyahay.

CUTUBKA LABAAD

DALAGYADA SALIIDDA (OIL CROPS)

1.8. SISIN (SESAME) (Sesamum indicum)

Sisintu waa dalag badanaa ka baxa meelaha hawada diirran leh inta badanna waxaa loogu beeraa dalag roobaad ahaan dhulka qallayl-xigeenka ah ee kulaalayaasha iyo kulaala-xigeennada. Itoobiya dalagga sisintu waxa uu ka baxaa woqooyiga iyo woqooyiga-galbeed ee dalka, inkasta oo ay soo saaridda Sisintu ka hoosayso heerkii la rabay haddana dhulka jooggiisu hooseeyo ee Webiyada dhex mara dhulka Soomaalida ayaa awood ballaadhan oo cimilo iyo biyaba u leh soo saaridda dalaggani. Dalaggan waxaa meelahaas laga beeraa bisha Juun ilaa iyo badhtamaha bisha Sibtembar waxaana la gooyaa bisha Oktoobar. Dalka Itoobiya waxaa ugu badan ee uu u usuuq geeyo caalamka ayay sisintu ka mid tahay. Noocyada sinsinta ee ka baxa Itoobiya ayaa waxaa ka mid ah noocyada loo yaqaanno Humera, Gondar iyo Wollega. Midhaha nooca Humera ayaa ah kan ugu muhiimsan ee uu dalku dibadda u dhoofiyo.

Shaxda 20aad. Muddeeyaha Xilliyada Beerista iyo Goynta Dalagga Sisinta

Gobolka	Dalagga	Wakhtiga	Xilliga	Billawga	Dhammaadka
Shabeelle, Liibaan, Afdheer, Faafan Iyo Daawa	Sisin	Beerista	Gu	March (Dhamm.)	April (Billaw)
		Goynta	Gu	June (Dhamm.)	July (Billaw)
		Beerista	Dayr	September (Dhamm.)	October (Billaw)
		Goynta	Dayr	December (Dhamm.)	January (Billaw)
		Goynta	Dayr	December (Dhamm.)	January (Billaw)

Dalagga (Crop): Sisin (Sesame) (Sesamum indicum)

Nooca (Variety): Kelafo-74(BSC-003)

Shaxda 21aad. Xidhmada Soo Saaridda Dalagga Sisinta

Tirsi	Maaraynta Dalagga	
1	Dhulka uu la Qabsaday	Dooxooyinka afarta webi, meelaha u cimilada dhaw iyo degaanka intiisa kale
2	Baahida Roobka	600 mm/sannadkii iyo wax ka sarreeya iyo waraab dheeraad ah haddii loo baahdo
3	Joogga Dhulka	500 – 1750masl (ka sarreeya heerka badda)
4	Xaddiga Abuurka	Sadar ku beeris 5 iyo saydhista oo ah 7

	(kg/ha)	
5	Kala Fogaynta Dhirta	Labada sadar 40cm iyo 10 cm oo la isu jirsiinayo labada geed
6	Bacrinta (kg/ha)	
6.1.	Urea	100kg/ha oo la isticmaalayo marka uu dhererka dalaggu gaadho lawga
6.2.	Dap	50kg/ha waxa loo isticmaali xilliga la beerayo dalagga
7	Qaabka Beeridda	Si toos ah ayaa dhulka loogu daadiyaa haddi sadar lagu beerayo ama la firdhinayo
8	Dhererka Godka Abuurka	2 – 3 cm
9	Soo saaridda abqada	45 – 50 maalmood
10	Bislaadka	80 – 85 maalmood
11	Cimriga Kooxda	Waxa uu ka mid yahay kooxda cimrigeedu degdegga yahay
12	Midabka Abuurka	Madaw
13	Dhererka Geedka	110cm
14	Dhadhanka iyo Tayada	Aad u Wanaagsan
15	Falcelinta Cudurka	Waxa uu u adkaystaa cudurrada iyo cayayaanka
16	Maxsuulka (q/ha)	
16.1	Beeraha Cilmi-baadhista	17
16.2	Beeraleyda	14

1.9. LAWS (GROUNDNUT/PEANUT) (Arachis hypogaea)

Dalagga Lawsku waa mid ka mid ah dalagyada sannadleyda ah waxa uuna u baahanyahay cimilo diirran iyo ilayska cadceedda oo ku filan si uu si fiican ugu baxo. Lawsku uma adkaysto qabawga/haamadayga wuuna dilaa waxa uuna u baahanyahay shan bilood oo hawo diirran ah. Lawsku waa dalag ku baxa roobka meelaha uu sida fiican uga da'o waxa uuna u baahanyahay roob xaddigiisu gaadhayo 1000mm iyo wax ka badan. Dhererka geedku waxa uu gaadhaa inta u dhexaysa 30 ilaa 50cm. Waxaa uu ku habboonyahay in laga beero dhulka carradiisu jilicsantahay ee ay isugu jirto noocyo badan si uu u helo noocyada nafaqada ee kala duwan kuna habboon habsami u koridda geedka iyo kor u qaadidda wax soo saarka iyo tayada midhahaba.

Shaxda 22aad: Muddeeyaha Xilliyada Baarista iyo Goynta Lawska

Gobolka	Dalagga	Wakhtiga	Xilliga	Billawga	Dhammaadka
Faafan	Laws	Beerista	Gu	March (Dhamm.)	April (Billaw)
		Goynta	Gu	June (Dhamm.)	July (Billaw)
		Beerista	Karan	July (Dhexda)	July (Dhamm.)
		Goynta	Karan	September (Dhexda)	September (Dhamm.)

Dalagga (Crop) Laws (GroundnutLPeanut)

Shaxda 23aad:Xidhmada Soo Saaridda Dalagga Lawska

Tirsi	Maaraynta Dalagga	
1	Dhulka uu la Qabsaday	Gobolka Faafan, dhulka la cimilo beereedka ah iyo dooxooyinka afarta webi.
2	Baahida Roobka	1000mm/sannadkii iyo wax ka badan ama in waraab lagu kabo.
3	Xaddiga Abuurka (kg/ha)	125
4	Kala Fogaynta Dhirta	Labada sadar 69cm iyo labada geed oo ah 15 – 20cm haddii uu dalaggu yahay nooca kor u baxa, ama 70cm iyo 20 – 25cm haddii uu dalaggu yahay nooca faafa.
5	Bacrinta (kg/ha)	isticmaalka bacrinaha uu ku jiro salfarku sida {(Calcium Ammonium Nitrate (CAN)} ayaa sare u qaada korodhka maxsuulka. Waxaa si aad u sarraysa loogu talo bixiyaa in loo isticmaalo lawska 100kg/ha oo ah (single superphosphate). Bacrinta waxaa la isticmaali inta aan abuurka dhulka lagu ridin iyada oo la adeegsan karo qaababka ay ka midka yihiin in lagu daadiyo meesha bannaan ee takaariga dushiisa ah ama lagu dul firdhiyo dhulka ka dibna ciidda lagu rogo iyada oo la adeegsanayo hadba qalabka carra-rogga lagu samaynayo. Waxa lagu talo bixiyaa N=25, P=50 AND K=30.
6	Qaabka Beeridda	Si toos ah ayaa dhulka loogu daadiyaa haddi sadar lagu beerayo ama la firdhinayo
7	Dhererka Godka Abuurka	5 – 10cm
8	Ubaxaynta	25 – 40 maalmood oo ku xidhan nooca iyo cimilada kala duwan.
9	Bislaadka	40 – 100 maalmood oo ku xidhan nooca iyo cimilada kala duwan.
10	Maxsuulka (q/ha)	Dhex-dhexaad ahaan 10kiintaal/hektarkiiba
11	Xaddiga Saliidda (%)	40 – 50

CUTUBKA SEDDEXAAD
DALAGYADA DIGIRAHA (LAGUME CROPS)

Dalagyada Digiruhu waxa ay ku abtirsadaan bahda loo yaqaanno **(**Legumonosae) waxa ayna ka mid tahay dalagyada ugu muhiimsan uguna horreeyay ee uu aadamahu u beertaan ka faa'iidaysigooda dhaqaale. Bahdani gudaheeda waxaa ku jira tiro aad u badan oo dhir kala duwan ah oo lagu qaddaro in ka badan 13 kun oo nooc balse waxa cunto aadame ahaan si ballaadhan loogu beertaa oo keliya ilaa 20 nooc halka dhinaca kalena ay jiraan noocyo badan oo loo beero calfinta xoolaha ha noqoto caleentooda ama midhahaba. Innagu halkan waxa aynu si kooban ugaga hadli doonnaa oo keliya dalagyada muhimadda gaarka ah ku leh dhulkeenna oo ay ugu sii mudanyihiin kuwan hoos ku qorani.

Shaxda. 24 Dalagyo ka mid ah digiraha ee laga soo saaro Itoobiya

Tirsi	**Dalagga**	**Xilli-beereed (2016/17)**	
		Dhulka la beeray (ha)	**Maxsuulka (Kiintaal)**
1	Shumburo (Chickpea)	225,607.53	4,441,459.26
2	Digir (Cowpea)	Ma helin	Ma helin
3	Misir (Lentil)	113,684.63	1,662,742.2
4	Faasuuliya/Haarikoot (Haricot bean)	290,202.43	4,839,226.5
5	Salbuko (Mung bean)	Ma helin	Ma helin

Dhinaca nafaqada dalagyada digiruhu waxa ay yihiin kuwo laga helo barootiin aad u badan oo meelo badan oo dunida ka mid ah ay dadku kaga maarmeen baahidoodii walxahaasi ee ay ka heli lahaayeen xayawaanka oo isagu ah mid qaali ah marka la barbardhigo kan digiraha. Waddammada dadkoodu saboolka yahay waxaaba jira qaar digiraha ugu yeedha ama ku magacaaba *"Hilibka Saboolka"*. Dhinaca kale waxaaba dunidan ka jira dad iyagu diidayba in ay quutaan hilibka xoolaha arrimo la xidhiidha waxyaabaha ay aamminsanyihiin kuwaasina baahidoodii barootiin waxa ay ka helaan dhirtani.

DIGIR (Vigna unguiculata)

Shaxda 25. Muddeeyaha Xilliyada Beerista iyo Goynta Dalagga Digirta (Crop Calendar)

Gobolka	Dalagga	Wakhtiga	Xilliga	Billawga	Dhammaadka
Siti, Faafan, Jerer, Qorraxay, Nogob, Shabeelle, Liibaan, Afdheer, Erer, dawa Iyo Doolo	Digir	Beerista	Gu	March (Dhamm.)	April (Billaw)
		Goynta	Gu	May (Dhamm.)	June (Billaw)
		Beerista	Karan	July (Dhexda)	July (Dhamm.)
		Goynta	Karan	September (Dhexda)	September (Dhamm.)

Dalagga (Crop): Digir (Cowpea Large) (*Vigna unguiculata)*

Shaxda 26aad. Xidhmada Soo Saaridda Dalagga Digirta

Tirsi	Maaraynta Dalagga	
1	Dhulka uu la Qabsaday	Shabeelle, Afdheer, Liibaan, DAAWA, Faafan iyo degaanka intiisa kale
2	Baahida Roobka	600 – 1000mm/sannadkii iyo waraab dheeraad ah haddii roob xaddigaas le la waayo
3	Xaddiga Abuurka (kg/ha)	25 – 30 Noocyada firida waawayn, halka kuwa midhaha yaryarna laga dhigayo 35 – 70
4	Kala Fogaynta Dhirta	Labada sadar 75 cm, labada geedna 20 cm oo ku salaysan nooca, carrada iyo cimilada goobta
5	Bacrinta (kg/ha)	Foosfar (P) oo la isticmaalayo laba nooca oo kala ah; Single Super Phosphate (SSP = 60kg/ha ama Tri Super Phosphate (TSP) = 25kg/ha. digirtu uma baahna bacrinta naytaroojiinta.
6	Qaabka Beeridda	Si toos ah ayaa dhulka loogu daadiyaa haddi sadar lagu beerayo ama la firdhinayo
7	Dhererka Godka Abuurka	2 – 3cm
8	Ubaxaynta	33 – 44 maalmood beerista ka dib
9	Bislaadka	110 – 120 maalmood oo ku salaysan nooca dalagga, ciidda iyo cimilada goobta.
10	Dhererka Geedka	30 – 35cm taasi oo uu xaddidayo nooca dalaggu
11	Dhadhanka iyo	Aad u Wanaagsan oo qani ku ah walxaha barootiinka

	Tayada	
12	Falcelinta Cudurka	Waxa uu u adkaystaa cudurrada iyo cayayaanka
13	Maxsuulka (q/ha)	5 – 28 kiintaal hektarkiiba maxsuulkana waxa mar walba saamayn ku leh; nooca, carrada, cimilada iyo adeegga loo fidayo dalagga.

3.2. DIGIR (COWPEA SMALL) (Vigina unguiculata)

Shaxda 27aad. Muddeeyaha Xilliyada Beerista iyo Goynta Dalagga Digirta (Crop Calendar)

Gobolka	Dalagga	Wakhtiga	Xilliga	Billawga	Dhammaadka
Siti Iyo Faafan	Digir	Beerista	Gu	March (Dhamm.)	April (Billaw)
		Goynta	Gu	May (Dhamm.)	June (Billaw)
		Beerista	Karan	July (Dhexda)	July (Dhamm.)
		Goynta	Karan	September (Dhexda)	September (Dhamm.)

Shaxda 28aad. Muddeeyaha Xilliyada Beerista iyo Goynta Dalagga Digirta (Crop Calendar)

Gobolka	Dalagga	Wakhtiga	Xilliga	Billawga	Dhammaadka
Jerer, Qorraxay, Nogob, Shabeele, Afdheer, Doollo, Erer, Libaan Iyo Daawa	Digir	Beerista	Gu	March (Dhamm.)	April (Billaw)
		Goynta	Gu	May (Dhamm.)	June (Billaw)
		Beerista	Dayr	September (Dhamm.)	October (Billaw)
		Goynta	Dayr	November (Dhamm.)	November (Dhexda)

Dalagga (Crop): Digir (Cowpea) (*Vigna unguiculata)*

Shaxda 29aad. Xidhmada Soo Saaridda Dalagga Digirta

Tirsi	Maaraynta Dalagga	
1	Dhulka uu la Qabsaday	Shabeelle, Afdheer, Liibaan, DAAWA, Faafan iyo degaanka intiisa kale
2	Baahida Roobka	600 – 1000mm/sannadkii
3	Xaddiga Abuurka (kg/ha)	60 – 70 Noocyada firida waawayn, halka kuwa midhaha yaryarna laga dhigayo 35 – 70
4	Kala Fogaynta Dhirta	Labada sadar 40 cm, labada geedna 10 cm oo ku salaysan nooca, carrada iyo cimilada goobta
5	Bacrinta (kg/ha)	Foosfar (P) ayaa loo isticmaali xaddi dhan 50 – 60 iyo walxaha orgaanigga ah.
6	Qaabka Beeridda	Si toos ah ayaa dhulka loogu daadiyaa haddi sadar lagu beerayo ama la firdhinayo
7	Dhererka Godka Abuurka	1.25cm
8	Ubaxaynta	33 – 44 maalmood beerista ka dib
9	Bislaadka	100 – 120 maalmood oo ku salaysan nooca dalagga, ciidda iyo cimilada goobta.
10	Cimriga Kooxda	Waxa uu ka mid yahay kooxda cimrigeedu dhex-dhexaadka yahay
11	Dhererka Geedka	30 – 35cm taasi oo uu xaddidayo nooca dalaggu
12	Dhadhanka iyo Tayada	Aad u Wanaagsan oo qani ku ah walxaha barootiinka
13	Falcelinta Cudurka	Waxa uu u adkaystaa cudurrada iyo cayayaanka
14	Maxsuulka (q/ha)	Maxsuulka waxa mar walba saamayn ku leh; nooca, carrada, cimilada iyo adeegga loo fidayo dalagga.
14.1	Beeraha Cilmi-baadhista	24
14.2	Beeraleyda	15

3.3. HAARIKOOT (HARICOT BEAN) (Phaseolus vulgarus)

Shaxda 30aad. Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Atarka

Gobolka	Dalagga	Wakhtiga	Xilliga	Billawga	Dhammaadka
Faafan Iyo Liibaan	Faasuuliya (Haarikoot)	Beerista	Gu	March (Dhamm.)	April (Billaw)
		Goynta	Gu	June (Dhamm.)	July (Billaw)
		Beerista	Karan	July (Dhexda)	July (Dhamm.)
		Goynta	Karan	September (Dhexda)	September (Dhamm.)

Haricot Bean (Phasoelus vulgarus)

Variety: Awash Melka

Shaxda 31aad. Xidhmada Soo Saaridda Dalagga Atarka

Tirsi	Maaraynta Dalagga	
1	Dhulka uu la Qabsaday	Gobollada Faafan, Liibaan, Dooxooyinka Webiyada iyo Meelaha la Cimilada ah
2	Baahida Roobka	500 – 1100mm/sannadkii
3	Xaddiga Abuurka (kg/ha)	Sadar ku beeris 70 – 90 iyo Saydhista oo ah 100 – 110
4	Kala Fogaynta Dhirta	Labada sadar 40 cm, labada geedna 10 cm
5	Bacrinta (kg/ha)	Naytaroojiin, Foosfar iyo Salfar (NPS) = 100
6	Qaabka Beeridda	Si toos ah ayaa dhulka loogu daadiyaa haddi sadar lagu beerayo ama la firdhinayo
7	Dhererka Godka Abuurka	5cm
8	Ubaxaynta	50 maalmood
9	Bislaadka	75 – 90 maalmood
10	Cimriga Kooxda	Waxa uu ka mid yahay kooxda cimrigeedu dhex-dhexaadka yahay
11	Midabka Abuurka	Casaan/Guduud
12	Dhererka Geedka	50 cm

13	Dhadhanka iyo Tayada	Aad u Wanaagsan
14	Falcelinta Cudurka	Waxa uu u adkaystaa cudurrada iyo cayayaanka
15	Maxsuulka (q/ha)	
15.1	Beeraha Cilmi-baadhista	25 – 31
15.2	Beeraleyda	18 – 27

3.4. SHUMBURO (CHICKPEA/GRAM) (Cicer arietinum)

Dalagga shumburadu waxa uu ka mid yahay dalagyada digiraha ee ku habboon buuraleyda jooggoodu sarreeyo iyo goobaha cimiladoodu qabawga tahay waana dalag loo isticmaalo ujeeddooyin kala duwan. Waxaana laga beeraa dhulka dhaca khadadka 39. 49. 48N and 37°51' ′.B dhul*kaasi* oo badda ka sarreeya 1899 masl.

Shaxda 3 2 aad. Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Shumburada

Faafan	Dalagga	Wakhtiga	Xilliga	Billawga	Dhammaadka
Faafan	Shumburo	Beerista	Karan	September (Billawga)	September (Dhexda)
		Goynta	Karan	November (Dhexda)	November (Dhamm.)

Dalagga (Crop): Shumburo (Chickpea)

Shaxda 33aad. Xidhmada Soo Saaridda Dalagga Shumburada

Tirsi	Maaraynta Dalagga	
1	Dhulka uu la Qabsaday	Banka Jigjiga, meelaha kale ee la cimilada ah ama u dhaw iyo degaanka intiisa kale
2	Baahida Roobka	350 – 400mm/sannadkii
3	Xaddiga Abuurka (kg/ha)	55 – 120 oo ku xidhan hadba abuurka la beerayo xajmigiisa (wayni/yari)
4	Kala Fogaynta Dhirta	Labada sadar 30 cm, labada geedna 10 cm
5	Bacrinta (kg/ha)	
5.1.	Urea	(N) 20 – 30kg/ha oo la isticmaalayo marka uu dhererka dalaggu gaadho lawga
5.2.	Dap	(P) 40 – 60kg/ha waxa loo isticmaali xilliga la beerayo dalagga

5.3.	K	(K) 17 – 25kg/ha haddii uu bootaasiyoomku carrada ku yaryahay
6	Qaabka Beeridda	Si toos ah ayaa dhulka loogu daadiyaa haddi sadar lagu beerayo ama la firdhinayo
7	Dhererka Godka Abuurka	5 – 8cm
8	Ubaxaynta	40 – 80 maalmood oo ku xidhan; nooca, carrada, biyaha iyo cimilada
9	Bislaadka	120 – 140 maalmood
10	Cimriga Kooxda	Cimri kala duwan ayuu leeyahay dalaggu
11	Midabka Abuurka	Midabyo kala duwan ayay leeyahay noocyada dalaggu
12	Dhererka Geedka	45 cm
13	Dhadhanka iyo Tayada	Aad u Wanaagsan qanina ku ah borootiinka
14	Falcelinta Aafooyinka Beeraha	Waxa uu ku xidhanyahay adkaysiga geedku nooca
15	Maxsuulka (q/ha)	– 12 nooca, cimilada iyo maaraynta ayaa muhiim u ah maxsuulka

3.5. SALBUKO (MUNG BEAN) (Vigna radiata L.)

Shaxda 34aad. Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Salbukada (Crop Calendar)

Gobolka	Dalagga	Wakhtiga	Xilliga	Billawga	Dhammaadka
Siti Iyo Faafan	**Salbuko**	Beerista	Gu	March (Dhamm.)	April (Billaw)
		Goynta	Gu	June (Dhamm.)	July (Billaw)
		Beerista	Karan	July (Dhexda)	July (Dhamm.)
		Goynta	Karan	September (Dhexda)	September (Dhamm.)

Shaxda 35aad. Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Salbukada (Crop Calendar)

Gobolka	Dalagga	Wakhtiga	Xilliga	Billawga	Dhammaadka
Jerer, Qorraxay, Nogob, Afdheer, Liibaan, Daawa, Doollo, Shabeelle Iyo Erer	**Salbuko**	Beerista	Gu	March (Dhamm.)	April (Billaw)
		Goynta	Gu	June (Dhamm.)	July (Billaw)
		Beerista	Dayr	September (Dhamm.)	October (Billaw)
		Goynta	Dayr	December (Dhamm.)	January (Billaw)

Dalagga (Crop): Salbuko (Mung bean) (Vigna radiata L.)

Shaxda 36aad. Xidhmada Soo Saaridda Dalagga Salbukada

Tirsi	Maaraynta Dalagga	
1	Dhulka uu la Qabsaday	Dooxooyinka afarta webi, faafan iyo degaanka la cimilada ah
2	Baahida Roobka	Waxa muhiim ah in uu helo roob dhex-dhexaad ah gaar ahaan inta u dhaxaysa ubaxaynta iyo dhammaadka xilliga abqaynta.
3	Xaddiga Abuurka (kg/ha)	10 – 15
4	Kala Fogaynta Dhirta	Labada sadar 40 cm, labada geedna 15 cm
5	Bacrinta (kg/ha)	
5.1.	Urea	(N) sida caadiga ah uma baahna maadaama uu dalaggu ka mid yahay bahda digiraha
5.2.	Dap	(P) 5 – 10kg/ha dhulka roobka, halka waraabkana loo adeegsado xaddi dhan 10 – 20
6	Qaabka Beeridda	Si toos ah ayaa dhulka loogu daadiyaa haddi sadar lagu beerayo ama la firdhinayo
7	Dhererka Godka Abuurka	4 – 5cm
8	Ubaxaynta	40 – 45 maalmood oo ku xidhan; nooca, carrada, biyaha iyo cimilada
9	Bislaadka	60 – 65 maalmood
10	Cimriga Kooxda	Cimri kala duwan ayuu leeyahay dalaggu balse si guud waa dalag cimri gaaban
11	Midabka Abuurka	Midabyo kala duwan ayay leeyahay noocyada dalaggu
12	Dhererka Geedka	60 – 76cm
13	Dhadhanka iyo Tayada	Aad u Wanaagsan qanina ku ah borootiinka
14	Falcelinta Aafooyinka Beeraha	Waxa uu ku xidhanyahay adkaysiga geedku nooca hadba la beero iyo xaaladda goobta
16	Maxsuulka (q/ha)	3 – 15 nooca, cimilada iyo maaraynta ayaa muhiim u ah maxsuulka

3.6. MISIR (LENTIL) (Lens culinaris Medika)

Shaxda 37aad. Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Misirka (Crop Calendar)

Gobolka	Dalagga	Wakhtiga	Xilliga	Billawga	Dhammaadka
Siti Iyo Faafan	**Misir**	Beerista	Gu	March (Dhamm.)	April (Billaw)
		Goynta	Gu	June (Dhamm.)	July (Billaw)
		Beerista	Karan	July (Dhexda)	July (Dhamm.)
		Goynta	Karan	September (Dhexda)	September (Dhamm.)

Shaxda 38aad. Muddeeyaha Beerista iyo Goynta Dalagga Misirka (Crop Calendar)

Gobolka	Dalagga	Wakhtiga	Xilliga	Billawga	Dhammaadka
Jerer, Qorraxay, Nogob, Afdheer, Erer, Liibaan, Daawa, Shabeelle Iyo Doollo	**Misir**	Beerista	Gu	March (Dhamm.)	April (Billaw)
		Goynta	Gu	June (Dhamm.)	July (Billaw)
		Beerista	Dayr	September (Dhamm.)	October (Billaw)
		Goynta	Dayr	December (Dhamm.)	January (Billaw)

Dalagga (Crop): Misir (Lentil) (Lens culinaris Medika)

Shaxda 39aad. Xidhmada Soo Saaridda Dalagga Salbukada

Tirsi	Maaraynta Dalagga	
1	Dhulka uu la Qabsaday	Gobollada faafan, Liibaan iyo degaanka la cimilada ah
2	Baahida Roobka	254mm oo roob ah sannadkii (waa xaddii aad u yar) ama waraab lagu kabo haddii xaddigaasi yar la waayo.
3	Xaddiga Abuurka (kg/ha)	30 – 40
4	Kala Fogaynta Dhirta	Labada sadar 45 – 60cm, labada geedna 30cm
5	Bacrinta (kg/ha)	
